

Tallaalka loo qaadanayo covid-19 gobolka Västra Götaland gudihiisa

Tallaalka shacabka ku nool Gobolka västra Götaland waxaa loo qaybiyay afar waji oo kala duwan. Tallaal in la heli karo bay ku xiran tahay dhaqsiyaya dadka loogu fidiyo tallaalka covid-19. Warbixinta xaaladda tallaalka markaa taagan waxay ku jirtaa 1177.se iyo bogga internetka rugtaada caafimaadka.

Dhammaan tallaalka loo qaadanayo covid-19 waa bilaash. Daryeelka caafimaadku kaama dalban doono inaad lacag bixisid, akoonkaaga ama koodh sir ah markii lagu tallaalayo.

Tallaalka dadka mudnaanta gaarka ah leh

Dadka ugu da'da wayn, dadka ugu nugul iyo dadka qaba cudurrada qaarkood baa tallaalka ugu hor qaadanaya. Haddii aad ka tirsan tahay mid ka mid ah kooxahaan dadka ah waxaa lagugu tallaali doonaa rugta caafimaadka aad ka qoran tahay ama qaybta takhasuska gaarka ah ee aad ka tirsan tahay. Xattaa shaqaalaha caafimaadka xiriir dhow la leh bukaanka waxaa loo baahan karaa in xilli hore la tallaalo. Qaabka lagu lasoo xiriirayo wuu kala duwanaan karaa, iyadoo ay ku xiran tahay hadba rugta caafimaadka ama xarunta qaabilaadda aad ka tirsan tahay. Warbixin ku saabsan tallaalka waxay ku jirtaa 1177.se iyo rugtaada caafimaadka boggiisa internetka.

Tallaalka dadwaynaha

Waxaa shacabka dhammaantiis loo fidin doonaa tallaalka covid-19. Tallaalka dadwaynaha wuxuu bilaabanayaa markii dadka ka tirsan dadka mudnaanta gaarka ah leh la tallaalo. Dadka ugu da'da wayn baa ugu horraynaya. Markii la gaaro tallaalka dadwaynaha, waxaa jiri doonta warbixin ku saabsan sida qofku ula xiriirayo oo ballanta tallaalka u qabsanayo. Haddii aadan akhrin karin Iswiidhish waxaad u baahan kartaa qofk kale oo yaqaan inuu kaa caawiyo si aad ballanta tallaalka khadka uga qabsatid. Waxaad sidoo kale wici kartaa qaybta qaabilaadda tallaalka bixinaysa. Tallaalku waxaa lagu qaadanayaa rugaha caafimaadka, isbitaalka iyo sidoo kale meelo gaar loo leeyahay qaarkood. Adiga dooran kara meesha aad rabtid inaad iska tallaashid. Waxaad sidoo kale iska tallaali kartaa gobol kale. Warbixinta xaaladda markaa taagan waxay ku jirtaa 1177.se iyo bogga rugtaada caafimaadka [vardcentrals webbplats](http://vardcentrals.webbplats) .

Ma dooran kartid tallaal

Gobolka Västra Götalandsregionen wuxuu haystaa isla tallaalka lasoo oggolaaday ee ay haystaan gobollada kale ee Iswiidhan. Ma dooran kartid tallaalka aad rabtid. Tallaalada ugu badan waxaa loo baahan yahay in labo jeer la qaato oo dhowr asbuuc u dhexayso si diffaac fiican loo helo.

Adeeg telefoon turjumaan leh

Gobolka Västra Götalandsregionen wuxuu leeyahay adeeg telefoon oo looga warbixinayo tallaalka. Waa isla warbixinta ku jirta 1177.se. Adeegga waxaa lagu heli karaa af-carabi, af-beershi iyo af-somali. Taas cagsigeeda kaama caawinayo inaad ballan qabsatid ama lagaga jawaabo su'aalo caafimaad.

Telefoon lambar: 010-473 94 30. Wakhtiyada uu furan yahay: 7-16.

Af carabi: 011-473 00 22

Af beershi: 011-473 00 23

Af somali: 011-473 00 24

Kasii akhri wajiyo u qaybinta bogga internetka Hey'adda caafimaadka dadwaynaha (Folkhälsomyndigheten).

Waxaa hadda bilowday tallaalka dadwaynaha

